

**Xeerka lamba. 35 rep.**

**Qaybinta, xagga saamaynta beerashada suufka, ee gobollada beeralayda ee degaanka iyo u xilsaaridda arrimahan dadka finjila badarka.**

## **MAAMULKA WASAAYADDA SOOMAAALIYA EE TALYAANIGA**

### **MAAMULAHA**

Marka uu arkay Xeerka 4 Nofembar 1951, lamba. 1301, oo lagu ansixiyay fulinta Heshiiska Ilaalinta Dalka Soomaaliya;

Marka uu arkay Amarka 3 Febraayo 1956, lamba. 4;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in goobo loo qaybiyo Gobollada beeraha, sidoo kale baahida loo qabo in la caddeeyo meelaha leh saamaynta wax beeridda;

Marka uu arkay tala so jeedinta ECOo.S. ee taariikhda 3 Abriil 1956;

### **WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

#### **Qod. 1**

Gobollada wax laga beero, eek u xusan qod. 3 ee Amarka 3 Febraayo 1956 lamba. 4, waxaa loo qaybiyay aagagga soo socda, sida ay warqadda ugu qoranyihiin 1: 1.000.000 oo ah qayb ka mid ah dekereetadaan:

#### **AAGGA LAMBA:**

#### **XUDDUUDAHA**

- |    |                |   |
|----|----------------|---|
| 1. | <b>Woqooyi</b> | :waddada Kenya ka bilaabata Libooye illaa Yoonte, oo sii marta Beled Qooqaani; jiidda Jubba Yoonte illaa Jelib; waddada Jelib- Mudun illaa Baraawe; |
|    | <b>Bari</b>    | : xudduudka Goboka Jubbada Hoose ka bilaabata Baraawe illaa Banweynta Hindiya;  |
|    | <b>Galbeed</b> | : xadka siyaasadeed ee Keenya kana soo bilowda Badweynta Hindiya illaa Libooye;   |
|    | <b>Koofur</b>  | : Badweynta Hindiya;  |
| 2. | <b>Koofur</b>  | : waddada Kenya inta u dhaxeysa Libooye iyo Dolow, qulqulka webiga Jubba inta u dhaxeysa Jelib iyo Mudun illaa laga gaaro Baraawe;                  |
|    | <b>Galbeed</b> | : xadka siyasadeed ee Kenya laga bilaabo Libooye illaa Doolow;  |
|    | <b>Bari</b>    | : xadka siyaasadeed ee Ethiyobiya laga bilaabo Dolow illaa Yeed;  |
|    | <b>Waqooyi</b> | : xadduuda Galbeed ee Degmada Xuddur,   |

Badhaba iyo Buur Hakaba iyo Yaaq  
Baraweyn illaa Baraawe ee jidka Jelib -  
Muddun

3. : dhammaan dhulka ka kooban Degmada  
Baraawe;
4. **Waqooyi** : xadka siyaasadeed ee Ethiyooberia lala  
leeyahay jiidka ku siman degmada Xuddur;  
**Bari** : xudduudka maamul ee u dhexeeya Gobollada  
Jubbada Sare iyo Hiiraan, laga soo bilaabo  
xadka Ethiyooberia illaa xudduudaha Gobolka  
Banaadir, xadka Degmada Wanla Weyn illaa  
Cadale; khadka Cadale ku xira Gololey,  
waddada Buulo Burde oo ay ku jiraan  
beeraha Gololey, daafaha bacadka bidixda ka  
xiga Webi Shabeele illaa loo gaaro badda  
Jasiira;  
**Koofur** :Khadka Jasiira, xadka Galbeed ee Beeraha  
Bariire ee aaggaas ku yaalla, War Dugulle,  
waddada Awdheegle-Buur Hakaba ka tagta  
War Dugulle illaa laga gaarayo xadka Buur  
Hakabo; xad koofureed Buur Hakabo;  
**Galbeed** :xadka Galbeed ee Degmooyinka Buur  
Hakabo, Baydhabo iyo Xuddur;
5. **Waqooyi-Galbeed** :xadka koofureed ee Buur Hakaba;  
**Koofur** :xadka Galbeed ee Degmada Marka ee  
Badweynta Hindiya;  
**Bari** :khadka Ceel Muunye ku xira Badweynta Hindiya  
illaa laga gaaro xadka Buur Hakabo, marka laga  
reebo dhanka bari dhammaan deegaanka Janaale iyo  
dhanka Galbeed dhammaan soomaalida ee Farkeyre  
oo aaggaas ka mida;
6. **Waqooyi** :xadka koofureed ee degmada Buur Hakaba;  
**Bari** :xarriiqa isku xira magalada Marka waddada  
Awdheegle-Buur Hakaba oo sii marta Mubaarak  
kuwaso beerahoodu aany ku jirin aggaan;  
**Koofur** :Badweynta Hindiya;  
**Galbeed** :xarriiqa ku xira Ceel Muunye Badweynta Hindiya  
illaa Koofurta Buur Hakaba, oo ay ku jiraan  
dhammaan beeraha Janaale, marka laga reebo

7. **Waqooyi-bari** :dhammaan beeraha soomaalida ee xiga galbeedka beeraha;  
:xarriiq Jasiira, ku dhaca Badweynta Hindiya, Bariira, War Dugulle, xadka koofureed ee Degmada Buur Hakaba ee ku dhaca waddada Awdheegle-Buur Hakaba, oo ay ku jiraan dhammaan beeraha ku yaalla Bariire;
- Koofur** :Badweynta Hindiya laga bilaao Jasiira illaa Marka;
- Galbeed** :xarriiq isku xira Marka illaa xadka Koofureed ee degmada Buur Hakaba, oo ku dhaca waddada Awdheegle-Buur Hakaba, oo si marta Mubaarak kuwaaso beerahoodu aanaynku jiraan aaggaan;
8. **Waqooyi** :xadka degmada Buulo Berde illaa isgoyska waddada Balcad-Buulo Barde;
- Bari** :waddada Balcad-Buulo Barde laga bilaabo xadka ee degmada Buulo Barde ka xiga woqooyi illaa koofurta magaalada Gololey marka laga reebo beeraha ku yaalla tuulada Gololey;
- Koofur** : xarriiq Cadale ku xira Gololey marka laga reebo beeraha Gololey;
- Galbeed** :xadka bari ee degmada Wanla Weyn;
- Waqooyi** :xadka siyaasadeed ee Ethiyobia laga soo bilaabo xadka bari ee degmada Xuddur marka laga aado waqooyi;
- Galbeed** :xadka galbeedka gobolka Hiiraan, waddada u dhaxaysa Buulo Barde iyo Gololey ee koofurta iyo xadka degmada Buulo Barde ee waqooyi;
- Koofur-galbeed** :xadka waqooyi ee bacad xeebeedka Cadale iyo Villabruzi.

## Qod. 2

Aagga lagu soo sheegay qod. sare waxaa galaya saamaynta beeraha soo socda:

- aagga lamba. 1 Shirkadda ROMANO,
- aagga lamba. 2 Shirkadda SISLA JUBBA;
- aagga lamba. 3 Shirkadda SEIS;

- aagga lamba. 4 Shirkadd SIIB;
- aagga lamba. 5 Shirkadda SISIA Banaadir;
- aagga lamba. 6 Shirkadda Walaalaha REGIS;
- aagga lamba. 7 Shirkadda SEIS;
- aagga lamba. 8 Shirkadda SISIA Banaadir;
- aagga lamba. 9 Shirkada SAIS.

### **Qod. 3**

Suufka nooca sanooyinka badan la beero waxaa loo gaar yeelay aagga lamba. 10 oo ka kooban dhammaan dhulka Cadale iyo bacad xeebeedka Villa-bruzia, Balcad illaa Afgooye iyo Jasiira.

### **Qod. 4**

Dekereetadaanu waxay dhaqan galaysaa maalinta lagu faafiyo Faafinta Rasmiga Muqdisho, 16 Abriil 1956.

Xoghayaha Guud  
**Franco**

Waxaa la hubiyay lana Diiwaangeliyay – Diw. lamba. 15, bogga lamba. 197.

Muqdisho 16 Abriil 1956.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**